

LEGAL TERMINOLOGY

ENGLISH – SOMALI

Translator and Editor : Muno Osmanⁱ, Abdinoor Jelleⁱⁱ

Referencesⁱⁱⁱ

A

Access: (akses): Marin: Xaquuqda uu leeyahay waalidka aan xaqa u laheyn booqashada iyo wakhti la qaadashada cunuga/ Ilmaha, xaquuqda lagusiinayo akhbaarta caafimaadkooda, hagaaga iyo waxbarashada.

Accused: A (Akuyused): Eedeysane: Qof lagusoo eedeeyay dambi ama maxkamad usaaran danbi

Acquittal: (Akuuittal): Siideyn: Go'aan maxkamadeed kaasoo qofka uusan aheyn dambilaha danbiga lagusoo oogay.

Act: (Akt): Qodob: Sharci soo maray talaabooyin kaladuwan ee looga baahanyahay sharciiyeynta oo noqday sharci meelmaray.

Action: (Akshon): Dhaqaaq: warbixin sharciiyeed kasoo eey keeneen dhinac kasoo horjeedo dhinac kale

Actus Reus: (Aktaas Reaas): Eray laatin ah oo lamid ah "ficial danbiyeed ama kareebid" tasoo marka la cadeeyo in kabadan shaki macquul ah oo lagu daro "maskax danbiile ah" soo saareyso danbiile masuuliyad sharci ah.

Adjournment: (adjoornment): Joojin: joojinta ama dib u dhigida warbixinta.

Adoption: (Adhopshon): Korsasho sharci ah: Qodobo sharciiyeysan kasoo masuuliyad sharcideedka iyo xaquuqda cunuga iyo mida waalidka dhalay lagu joojinayo oo xaquuqu iyomasuuliyad cusub loo sameynayo cunuga iyo waalidka korsashada sharciiyeysan kuqaadanayo cunuga.

Affidavit: (Affidhaafit): Qoraal dhaar ah: Qoraal dhaar ah oo xaqiiq go'aaneed taasoo sameeeyay qof hoos imaanayo ama ansaxin uu meel mariyay qof kale oo sharcuga uu awood siiyay

Affidavit of Service: (Affidhaafit of serfis): Qoraal dhaar ah oo taageerayo kiiska: waxaa kale oo loo yaqaanaa cadeeyn shaqo-waa qoraal muhiim ah uu dhiibo qof ka geeyo warqadaha sharciiyeysan kadib qaab guul ah oo uu ku siiyo cadeynta qof kale.

Affirmation: (Afaamashon) Ansaxin: Dhaar cadeyneyso in run la sheego

Alternative Dispute Resolution: (altanatif disbuyuud risoluushon): Qaab kale oo muran lagu xaliyo: waxaa laga wadaa qaab kaste oo muran lagu xaliyo oo kabaxsan maxkamada. Waxaa ka mid ah Gorgortan, Isafgarad, Dhaxdhaqaadin iyo Garsoorid.

Arbitration: (Arbitareeshon): Garsoorid: tani waa warbixin taasoo muranka lagu xaliyo in qof sadexaad oon ee xaneynin, kaasoo go'ankiisa eey qeybaha muranka dhaxyaalo ogolaadeen, noqonadoono kamadanbeyn iyo xirid.

Collaborative Family Law: (Kolaboratif famil low): islaogolaanshaha xeerka qoyska: waa talaaboyin eey dhinacyo kaladuwan iyo abuukaatahooda ku ogolaadeen iney isku dayaan in eey murankooda kuxaliyaan xeerka qoyska arimo la xiriiro ayagoon aadin maxkamada.

Mediation: (Medhiyeeshon): Dhaxdhaxaadin: waa qaab lagudooranayo xalinta muranka (DXM) taasoo qeybaha xal sharciyeedka lakulmayaan qof sadexaad dadaaal lagu raadinayo xalka keyska. Qofka sadexaad waxaa la dhahaa dhaxdhaxaadiye.

Amicus Curiae: (Amikaas kuriaa): waa eray latin ah “saaxibka maxkamada” kani waa abuukaate kaasoo caawiya maxkamada asagoo matalayo boos sharci ah oo talaabooyin makamadeed, sida caadada ku ah marka maxkamada codsato.

Annulment: (Annulmenti):Guur burburin:go’aan makmadeed oo sheegayo guur in uusan aheyn guur sharciyeysan. Kudhawaaqan waxuu lamacnayahay inuusanba guurka dhicin.

Answer: (Ansar):Jawaab: jawaab eeey bixiyeen qeeb o kusocoto qeyb kale oo eedeysay ama talaabo maxkamad socoto.

Appeal: (Appiil):Racfaan:Codsi kusocdo maxkamada sare si eey dib ugu eegto go’aan maxkamada hoose. Tani waxeey lamicne tahay ineey jirto arin sharci ah oo racfaan ku qaato sida (xaakimka inuu sameeyay khalad markuu isticmaalayay sharci kusaabsan kiiska.

Appellant: (Appeellant):Racfaanqaate: qof buuxiyay ama keenay racfaan.

Applicant: (Applikant):Codsade: Qof buuxiyaya ama sameeyay codsi.

Apprehend: (Apprehendh): (1)Xirid:qof in lakaxeysto,qabto, asagoo la isticmaalayo waaran ama awooda sharciga.(2)waxaa laga wadaa ilmo laga kaxeeyey waalidkiis ama qofkale oo eey kaxeystaan askarta ama dadka caruurta difaaca sababo la xirirto amaankiisa.

Arraignment: (Arreegnment): Horkeenid maxkamad: talaabooyin kootka kaasoo eedeysanaha la farfiiqayo,xukunka loo akhrinaayo si cad, ayada ama asagana laweydiinayo inuu galo ama qirto inuu danbiileyahay ama uu san danbi laheyn.

Arrears: (Arriaas):Deyn: lacag aan la bixinin ama qeyb kali laga bixiyay xiligii lagaa rabay.

Arrest: (Arest):Xirid: ficilka lagu dhigayo qof xabsi adeegsiga sharciyeed guud ahaan, taasoo looga jawaabay danbi oogid.

Assessment: (Asesment):Baarid:(1) qiimaha lacacageed ee lagu qiyaaso alaab. (2) qaabka sharciga danbiilaha:In la go’aamiyo in qof uu xanuun maskaxed qabay xiliga asaga ama iyada uu galay danbiga. (3)Qabka sharciga gaarka ah: in la go’aamiyo in uu qof leeyahay qacgliga uu ooga taxadari karo maalkiisa, si uu ooga garo go’aan kusaabsan taxadarkeda, ama uu ku shaqaaleeyo xirfadaha aabuukaate uuna ku tilmaamo.(4) qaabka sharciga ama xerka qoyka:in la helo kartida ama wax qabadka waalidka si eey u awoodaan hanashada baahida ilmahooda.

Attorney: (Attooni):Abuukaate: qof awood loo siiyay in uu isticmaalo sharciga iyo iinuu matalo dad si sharci ah.

B

Bail: (Beyl):Damiin:Hanashada siideyn qof la xiray asagoo la balan qaadayo inuuu qofka soo hor imaaan doona maxkamada xiligii la amro sidaas inuu sameeyo. Waxaa kale uu erayga noqonkaraa lacagta balanqaadka eh e la bixiyo si qof loo damiinto.

Balance of Probabilities: (Balansi of probabilitis):Cabir qiyaasan: cadeyn goan oo looga baahanyahay ficil xeeredka si loogu cadeeyo xaqiiqda qeybaha eedeysan. Waxaa laga wadaa goaan gaadhista in xaqiiqda loo tixgalinayo sida loo cadeeyay hadeey cadeynta tuseyso iney u badantahy iney u dhawdahay xaqiiqda iney dhacday in kabadan ineeysan dhicin.

Bankrupt: (Bankrapt): Ceyd:Qof ama heyad uu sharcugu ku cadeeyay in eean deyn lagu leeyahay iska bixin Karin.

Bankruptcy: (Bankrupsi):Masaluf:Ficil sharciyeysan oo ka midtahy qof ama mashruuc kuwaasoo awoodin in eey deyn lagu leeyahay iska bixiyaan.

Bar: (Baar):(1) Darbi ama Line: wax muuqdo oo kal;a qeybiyo qolka maxkamada mesha shaqada iyo meesha dadka bulshada.(2) ama shaqada sharciga.

Barrister: (Baaristar):Abuukaate u dooda dadka: abuukaaaha dadka u doodo oo kutakhasusay dacwada qolka maxkamada.abuukaate kutakhasusay inuu waaniyo qofka u diyaargaroobaya diyaarinta cadeyn sharciyeysan dhanka xafiiska. Wadanka Canada, qareeka ama abuukataha waxaa looguyeraa qofka udooda dadka iyo kan waaniyaba. Mana jiraan wax u dhaxeeyo waaninta iyo u doodidaba.

Bench: (Benji):Kursi: (1)meel cadaaladeed oo ka kooban xaakim iyo goaanka maxkamadeed. (2) kuraasta eey kufariistaan xaakimyada maxkamada.

Beneficiary: (Binifishari): Dhaxle: kani waa qof lo lacag ama faa iidooyin kale taasoo ka dhalatay is afgarad ama cadeyn sharciyeysan sida wax lagu aaminay, dhaxal ama contracto.

Best Interest of the Child: (Best interest of the jildh): waxa ufiican cunuiga: tani waa baadhitaan si sharciyeysan oo uu xaakim gaadhay oo ku saabsan xaaladaha hareereeya cunug ee xerka qoyska si uu goaan ooga gaaro sida oogu fiican ee cunuga amaanka korkiisa,maskaxdiisa iyo dareenkiisa fiicnaashiisa iyo koristiisa lagu ilaalinaayo.

Beyond a Reasonable Doubt: (Beyondh a riisonable dhoobt): Si shaki la'aan ah: Tani waa cadeyn go'an oo loo baahanyahay si lagu soo xukumo qof lagu soo eedeeyay danbi. Kiis wadaha waa inuu keeno cadeyn buuxdo oona qanciso xaakimka si shaki la'aan ah oo ku saabsan eedeysanaha.

Bill: (Biil): qoraal sharciyed aan wali la mel marinin: kani kani waa sharci lasoo jeediyay amasharci lasoo hor kenay laanta sharciyada ee Canada si loo ansixiyo. Qoraalka faderaalka ah waxaa khasaqb ah inuu maro qeybahiiso dhan-akhriska koobaad,akhriska labaad,qeybta gudiga, iyo akhriiga sadexaad- ee aqalka hoose iyo aqalka sare kahor intuu helin ogolaanshaha boqortooyada uusan noqonin sharci doowlada kamid ah.

Binding: (Bindhing):Waajib ka dhigid: Dajinta contacta sharci ah oo waajib ah.

Bond: (Bondh):Curaar: Balan ama waajib saaran makhkamada.

Burden of Proof: (Burdhen Of Proof): Culeyska cadeynta: Shaqo la siiyay oo la kor saaray qof caadiya ama danbiile eh si uu u cadeeyo ama kucadeyn waayo xaqiiq lagu murmay.

Balance of probabilities: (Balansi of Propabilitis):Cadeyn Qiyaasan: Culeys cadeyn oo maxkamad caadiya,ama qeyb kiiskooda oo u baahan oo kaliya inuu ka cadyahay kuwa kale.

C

Case: (Kiis):Kiis: Muran ka dhaxeeya laba koo oo iska soo horjeeda kaasoo lagu xalin doono maxkamad, ama wax u dhigma maxkamad sharciyadeeda wuxuu noqon kara danbi ama wax caadi ah.

Case Conference: (Keys konferance): Isu imaansho Kiis: shirk a dhexeeyo labo dhinac, abuuratayaal(hadey jiraan) iyo xaakimka si looga hadlo sia wax looga qaban lahaa iiska ama is afgarad sida qaab maxkamad.

Case Event List: (Keys efent Liisto): Tani waa liis ama diwaan maxkamadeed oo la maqli doono maalin gaar ah. Tani waxaaa kaloo loo yaqaanaa galka kiisaska xaakimka.

Case Law: (Keys Law): Kiis sharciyeed:kani waa sharci eey sameeyeen xaakimyaal ayagoo go'aan ku gaaraya maxkamad iyo xubno lamid ah kuwaasoo goansado kiisas khaas ah.

Case Management: (Keys Manajment): Keys ka shaqeyn: Qaab kood kaasoo u ogolaanayo xaakimka inuu ilaaliyo uuna ka shaqeyyo hor u marka kiiska maxkamada sida uu usocdo.

Cause of Action: (Kause of akshon): Qaab xaleedka: xaqiiqooyin la dajiyay oo kufilan ineey cadeeyaan xaquuqda lagu maxkamadeeynkaro si loogu helo lacag, xoolo,ama hirgalinta xaquuqda kasoo horjeedo koox kale.

Caveat: (kafiit):Isilaalin: kani waa eray latin ah oo laga wado "Ha is ilaaliyo". Waa digniin sharci ah oo dikumiinti maxkamadeed.

Certificate: (Sertifikeyd): Shahaado: Qoraal cadeyn ah kaasoo cadeyn sharci ah kaasoo shuruud ama wax loo baahanyahay oo la helay ama la helin.

Certify (a copy): (sertifay)(a copy)(koopi): Cadeeyn (koopi ah): cadeeyn koopi ah taasoo la saxiixay lana baraaweeyay si ka saxsan kana dhameytiran soo saaridii cadeynta laga koobiyeeyay uuna sameeyay mushtamac la aqoonsanyahay.

Charter: (Jaatar): Xeer: (1)Xeerka Canada ee xaquuqda iyo xornimada dalka Canada waxaa inta badan loogu yeeree xeer. Wuxuu xaqiijiyaa udubdhiga xaquuqda ama xornima dadka kunool wadanka Canada sida, xornimada hadalka,xornimada diinta,iyo xaquuqda nololeed iyo xornimo shaqsiyeed.(2) cadeyn sharciyeysan taasoo awoodlaha ama dowlada eey siineyso xaquuq, awood iyo faaiido gaar ahaaneed oo la siiyay qof,mashruuc ama dad.

Child: (Jildh):Cunug: Saqiir ama cunug jooga Canada waa qof aan aheyn Qaangaar kaasoo ka hooseyo dada inta badan. Da'da intabadan Canada waxaa go'aamiyo gobalkaste iyo Qeybkaste ee Canada. Inta badan gobalada Canada da'da inta badan waa sided iyo toban. Qoraalka Unta ee xaquuqda ilmaha waxuu ku qeexay cunug inuuyahay qof kaste oo ka hooseeyo sided iyo toban(18),”Sida uu qoro sharciga ku aadan ilmaha ,inta badan waxaa la gaaraa xili hore’.

Child Abduction: (Jildh Abdukshon):Ilmo afduubid:kabixinta si sharci daro eh ilmo heynta waalidkiis ama dadka sida sharciga lagu magacaabay ee korinayo. Sidan waa danbi cara leh.

Child Abuse: (Jildh Abiyuus):ilmo kataxadar la'aan ama xumeyn: ilmo xumeyn waa danbi kaasoo isu keenaayo dabeecado kale duwan kamidtahay jidhka,darenka ama dhaqanxumo galmo ama kataxa darid la'aan ilmo.

Child in need of protection: (jildh in needh of protekshon):qaabab la qaado si ilmo looga difaaco waxyeelo, loo hor mariyo daacadnimada qoyska lana balanqaado ilmaha sida u fiican.

Child Support: (Jildh Saboot):Masruuf caruureed: lacagta uu bixiyo waalidka aan ilmaha heynin si uu ooga qeyb qaato qarashka korinta cunigiisa ama cunigeeda.

Child Support Guidelines: (Jildh Saboot Gaydhlinis):Qoraalka masruufka cunuga: Amaro cad kuwaasoo koodka uu u isticmaalo inuu dajiyo masruufka cunuga iyo waliba qoraaal gaara oo tirinayo masruufka laga rabo qofka waajibka kutahay inubixiyo intuu la'egyahay. Inta laga rabo waxeey kuxirantahay qofka xoolaha uu shaqeysto inteeey la'egyihiiin iyo inta caruur ah oo uu ku qasbanyahay inuu wax ka koriyo. Gobal kaste wuxuu leeyahay qoraal ugaar ah.

Child Welfare: (Jildh Welfeya):Samofal Cunuga: Wadanka Canada tani waxaa weeye qaabka caawinta ciyaalka kaasoo eey meel dhigeen gobalka iyo qeybaha dowlada, mararka qaar ayagoo kaashanaayo heyado si gaar ah loo leeyahay si eey ugu diyaariyaan howlo badalo ama u dhigmo waalidka xanaanadiisa iyo ilaalintiisa.

Civil Law: (Sifil Low): Sharci Shifil: (1) Laan sharciiyeed laga soo qaaday ama kasoo askuntay si toos ah sharciga Romanka, kaasoo qeexaya xaquuq gaar ah iyo dawo, hogaamineysana muran ka dhexeeyo dad sida meelaha contractaha, maal iyo xeer qoys;(2) sharci u khuseeyo muranada u dhexeeya labo qof kaasoo kusaabsan sida maal,qoys,shaqo iyo wax la mid ah. Waxeey ka baxsantahy sharciga danbiilaha ama mushtamaca.

Claims: (Kaleeymis):Cabasho: Xaqiiq dhaliso in sharci ahaan xaquuq la meel marin karo ama ficil la xiriiro laan sharciiyeed.Codsi gargaar.

Statement of claim: (Istatment of aleym):Weedh cabasho:codsi kusocdo maxkamad sharciga sheegayana sababta qof uu u keenayo ficil sharci ah oo kasoo horjeedo qof iyo waxa eey ka rabaan.

Cohabitation: (Kohabitashon): Wadajiritaan: waa marka laba qof oon isqabin ama is qaba eey wadajir isula nool yihiin sida xaas. Waxaa la dhahaa wadajiritaan.

Cohabitation agreement: (Kohabitashon Agriiment):Is afgarad Wadajiritaan: Waa qaab sharci is afgarad ah ooy gaareen labaqof dhaxdood kuwaasoo doortay ineey isla noolaadaan (ama lab iyo dhadig ha

ahaadaan ama lab kali ama dhadig kali ah) Lamaanaha noocan ah waxaa loola dhaqmaa sida dad isqaba, sida, xiliga eey codsanayaan guri ama ey diyarsanayaan masrufka cunuga.

Collaborative family law: (Kollabaratif family low) :Kawada shaqeynta xeerka qoyska: tani waa wado sharci ah taasoo u ogolaaneyso dad isqaba kuwaasoo go'aansadey ineey kala tagaan ama guurkooda eey burburiyaan iney la shaqeeyaan looyaradooda iyo aqoonyahanada kale si eey ugu guuleystaan is afgarad u wanaagsan baahida gaarka ah ee labada dhinac iyo caruurtooda ayagoo maxkamad aadin.

Commission: (koomiishon) Gudoomin/ Dilaal: (1) Lacag labixiyo taasoo kuxiran iib uu sameeyay shaqaale ama dilaale.(2) Awooda qof leeyahay taasoo uu ku iibiyo beecsharada/ganacsiga qofkale. (3) Waaran ama awood dowlada ama maxkamad katimid , taasoo awood siineyso qof loo magacaabay in uu fall diwangashan fuliyo. (4) Ficilka sameynta ama falida danbi.

Common Law: (Koomon low): Sharci Maxkamadeed: waa sharci eey sameeyen xaakimyo ayagoo isticmaalayo go'aanka maxkamada lana mid ah maxkamada caadilka ah kuwaasoo go'aansado kiisas gaar ah.

Competence: (Kompetensi): Awood xirfad: Awood maskexaad uu qof leeyay si uu ooga qeyb galo waxbixin sharci ah ama kala iibsi, iyo xaalada maskax qof qasab ku ah inuu yahay si uu u qaado masuuliyada go'aamada iyo ficiladiisa.

Complainant: (Komplainant): Dacwad qabe: qof wado arin sharci ah ama dacwad kasoo horjeeda qof kale. Qof dulin danbi lagu sameeyay ayaa dacwad qabe kasoo horjeeda danbilaha noqon kara.

Conference: (Konferans): Shir: Shir aba dhinac ama qareenooda kiiska oo isku dayaya in eey arin meel isla dhigaan.

Case conference: (Kes Konferens): Shir kiiseed: Shir kiiseed waa shir u dhaxeeyo Xaakim, dhinacyada iyo dhinacyada qareenadooda si eey isugu dayaan ineey qeexaan arimaha dhinacyada eey ku heshiin karaan iyo meelaha arimaha ee la isku khilaafsanyahay. Waxaa kale ooy falenqeeyaan qaababka lagu xaliyo arimaha lagu muransanyahay.

Pre-trial conference: (Pri-traayal Konferens): Shir xiliga maxkamada kahor: shir aan diwaan gashaneyn oo xiliga maxkamada ka hor oo u dhexeyo qareenada iska soo hor jeedo iyo xakimka. Waxeey ka tashtaan arimo muhuum ah oo la xiriiro kiiska. Waxaa laga yaabaa ineey isku dayaan ineey jilciyaan arimaha, helaan in muranka la xalin karo ayagoon maxkamad tagin, iyo hadeey dhinacyada aadan maxkamad meeqa maalmood oo dhageysi ah aa loo baahanyahay.

Confession: (Konfeeshn):Qirasho: qoraal uu qofka ku sheegayo danbigiisa ama keeda oo lagu soo xiray in kabadan hal danbi laguna xukumay hal wakhti oo xabsi ah asaga/agayada waxa la dhihi karaa ineey gudaan xukun kadanbe xukun kale. Tani waxeey keeni kartaa wakhti dheer oon xabsi.

Concurrent Sentence: (Konkarent Sentensu): marka qof lagu soo xiro kabadan hal danbi laguna xukumo in kabadan hal xukun oo xirid ah, asaga/ayada waxaa ladhihi karaa ineey gutaan xukunada halmar . Tani waxeey keeni kartaa wakhti qabsiyeed yar.

Consent: (Konsent): Ogolaansho: ogolaansho ama fasax lagu ogo laanayo in wax lagu sameeyo.

Consent order: (Konsent Ordha): Ogolaansho Amar: Amar maxkamad taasoo dib u eegeyso heshiis laba dhinac oo muransan ka dhexeyso. Waxey leedahay dareen amar maxkamada mid lamid ah waxaana fulin karo maxkamada haduu qof raaacin.

Contempt of Court: (Kontemt of Kort): Naceyb/Kasoo horjeedsi Maxkamada: Kasoo horjeedsasho ama xushmad la'aan taasoo kusaabsan maxkamad sharci ah, iyo kuwa fulinaayo. Tani waa danbi.

Contest: (Kontest) Diidid: In la mucaarado ama laga soo horjeedsado cabasho maal ama xukun lagusameeyay maxkamad.

Contract: (Kontract): Heshiis: Heshiis abuurayo waajibaad uu meel marinayosharciga. Waxyaabaha muhiimka u ah heshiiska waa, heshiis isafgarad, kafikir taxadar leh, muga labada dhinac iyo heshiiska inta uu sharciga waafaqsanyahay.

Controlled Act and Substances Act: (Kontroledh Akt And Substansi Akt): Fecil xadidan iyo ficil muqaadaraad: Tani waa dowlad sharciyeedka wadanka Canada taasoo lagu ilaalinayo dawooyinka waxyeelada leh iyo muqaadaraadka sida xashiishka iyo tubaakada.

Conviction: (1) Kuxukumid dambi: Go'aan maxkamadeed oo ah qof inuu dambiile yahay. (2) Talaabooyin maxkamadeed taasoo xaakim ama xaakimyaal eey kuheleen qof inuu yahay dambiile eedeed.

Corollary Relief: (Korolari Riliif): Raadinta amar masruuf: Dacwad lagudoonayo masruuf xaas, masruuf ilmo, korsasho iyo helitaanka furid kadhacday maxkamad.

Costs: (Kostis): Kharashaad: Lacag eey maxkamadda kuxukunto qeyb iney siiso qeyb kale oo keentay ama difaacday ficil maxkamadeed ama lacagta lasiiyo maxkamadda kadib markii qeybtaasi eey raaci waayeen maxkamadda amarkeeda.

Counsel: (Kawnsal): Lataliye sharci: Abukaate / Qareen kaasoo bixiyo latalin sharciyeed mase matalo qof gaar eh.

Count: (kawnt): marka la eego kiis dambi, qodob kasto waa weedh oo ah eed dambiyeed kaladuwan.

Court: Koort (Maxkamad): Maxkamad waa hay'ad ama maxkamad gaar ah kuwaasoo leh awooda eey kuxukumaan muran sharci ah oo ka dhexeeyo labo qeyb iyo sameynta maamul daacad ah oo manaal, danbi, hogaamin iyo arimo kale oo ku aadan sharciga dhulka.

Supreme Court of Canada: (Subriim koot of Canada): Maxkamadda sare ee Canad: Waa maxkamadda ugu sare ee wadanka Canada iyo maxkamadda ugu dambe ee racfaanka ee sistamka cadaalada wadanka Canada.

Court of Appeal: (Koot of Abiil): Maxkamadda racfaanka: waa qeybta maxkamad ee oogu saree e ka jirto gobal kaste. Waxey dhageeysataa racfaan kayimid go,aan ka yimid maxkamada saree e caadilk ah ee gobolkaas.

Superior Court of Justice: (Subiiriya koo of justiiis): Maxkamada Saree e caadilka: Gobal kaste iyo qeyb kaste waxey leedahay maxkamad sare oo loo yaqaano magacyo badan, ooy ka mid yihiin,maxkamada saree e caadilka, maxkamada sare iyo maxkamada boqorada kursigeda. Maxkamadaha sare waxeey

leeyihiin “ Dhaxal awood sharciyeed,” taasoo lamacna ah ineey maqli karaan kiisas meelkaste marka laga reebo sida kuwa gaarka ah looguxadiday qeyb kale oo maxkamad. Maxkamada sare waxey isku dayaan kuwa oogu daran kiisaska danbiyada iyo manaalka , marka lagu daro kiisaska furitaanka, iyo kiisaska la xiriiro lacag fara badan. Gobalka Alberta arinkasto oo cabashada, qiimaha hantidda laga wada hadlayo eey ka badantahay Kontan kun oo doolar(\$ 50,000.00) waxaa laga yaabaa ineey go,aamiso maxkamada Boqara kursigeeda. Maxkamadan waa maxkamada xukunka danbiilayaasha, qoyska iyo arimaha manaalka. Waxaa kale ooy ka shaqeysaa Ceydhnimada,hantida iyo arimaha kutiirsan dadka tabargalka ah. Gobalka Alberta, racfaanka ka imaado maxkamad gobaleedka waxaa lagu dhageystaa maxkamada kursi boqareedka

Family Court: (Famili Koot): Maxkamada qoyska: Gobalada qaar waxeey isu geeyeen maxkamadaha qoyska taasoo ogolaaneyso in arin kaste oo laxiriirto arimaha qoyska in looga shaqeeyo hal maxkamad gudeheed. Gobalka Alberta , maxkamada boqorad kursiyeedkka iyo maxkamad gobaleedkaba – qeybta qoyska, ayaa ka shaqeeyso arimaha xerka qoyska.

Small Claims Court: (Ismool Kaleymis Koot): Maxkamada Cabashada yar: Maxkamada cabashada yar waa qeyb mmanaal ee maxkamad gobaleedka Alberta. Waxeey go,aamisay muran kusaabsan lacag bixin ama soo celinta ama mulkinta maal gaar ahaaned taasoo lacagta loo dooday eeysan ka badneyn Konton kun oo doolar (\$ 50,000.) Amarada iyo qaababka ee maxkamadan weey fududyihiin dakaana wax ka qaban karo arimahan ayagoon caawimaad ka helin qareen.

Creditor: (Kiridheeta): Deb bixiye: Qof kaasoo lacag, alaab ama howlo kuleh qof kale.

Criminal Code of Canada: (Kriminaal Koodh Of Kanada) : Qoraal danbiyeedka Canada: kani waa ficil sharaxayo inta badan eedaha danbiiyada iyo ciqaabtooda, iyo qaababka danbiyada ee Kanada. Kani waa sharciyo eey sameeyeen baarlamaanka loona isticmaali karo Kanada oo idil.

Criminal Law: (Kriminal Low) : Sharciga Danbiilaha: Laanta sharciga ee qoraalka danbiyada ee Kanada. Waxeey ka shaqeysaa fal loo yaqaano inuu waxyeelayo mushtamaca dhamaantii taasoo sharciga uu mamuucay, dowladana eey ilaalineyso oo ciqaabeyso.

Criminal Record: (Kriminal Rekoodh) : Diwaan danbiile: waa isku soo koobida qof danbiile eh xiritaanadiisa.

Cross-Examination: (Karoos-Eksaaminaashon) : Su,aalida Maxkamada: waa su,aalida makhraati xiliga maxkamada ooy su,aalayaan qeybta kasoo horjeedo.

Crown: : (1) Boqortooyo: Brortooyo ama Dawlada: Qareen dowladeed kaasoo xeer ilaalinta kiisaska danbiyada uqabto dowlada.

Crown Attorney: (Karawn Attorney) : Qaraan Boqortooyo: qareen kaasoo madalo boqortooyada (dowlada), oona bilaabo oo qabto dacwad danbiile maxkamada gudaheeda asagoo kasoo horjeedo qof lagu eedeeyay danbi.

Crown Prosecution: (Karawn Prosekushon) : Boqorooyo Xeer ilaalin : Wadida qareenka boqortooyada kasoo horjeeda qof kuxukunka qofkaas danbi iyo keenida asaga ama ayada in la maxkamadeeyo.